Soomaaliya: Midowga Yurub oo lacag ku biiriyey maaliyaddii uu siiyey UNICEF si uu u caawiyo carruurta ay saameeyeen dhibaatooyinka bani'aadamnimada

Muqdisho, 17ka Luuliyo 2018 – Midowga Yurub ayaa 5 milyan oo Euro oo dheeri ah ku biirinaya taageerada bani'aadamnimada ee uu siiyo hawsha UNICEF ee carruurta ay la soo gudboonaadeen dhibaatooyinka hadda ka socda Soomaaliya ku siineyso adeegyo caafimaad, nafaqo, biyo iyo fayadhowr, waxbarasho iyo ilaalin oo lagu badbaadinayo naftooda.

Qaaraankan ayaa wadarta taageerada uu Midowga Yurub bixiyey sanadkan oo keliya gaarsiinaya 8 milyan oo Euro, iyada oo 3 milyan oo Euro uu bixiyey goor hore oo sanadkan ah si wax loogaga qabto abaartii ba'neyd ee sanadkii hore dhacey, fatahaadaha sanadkan, ee saameeyey 830,000 qof oo ku nool bartamaha iyo koonfurta dalka, iyo si loo taageero 170,000 qof oo kale oo saameyn xun ay ku yeelatey Duufaantii Sagar ee ka dhacaydey waqooyiga dalka.

"Raadadka aadka u xun ee ay reebeen abaarta labada sano jirtey iyo daadadkii/fadahaadihii dhowaan dhacay oo ay weheliso colaadda ayaa dhibaato weyn ku reebey nolosha Soomaalida badanaana carruurta ayaa ah kuwa ugu horreeya ee u silca," ayaa uu yiri Guddoomiyaha Guddiga Gargaarka Bani'aadamnimada iyo Wax-ka-qabashada dhibaatooyinka mudane Christos Stylianides. "Maaliyaddan cusub ee Midowga Yurub ayaa is-beddel mug leh keeni doonta iyada oo ilaalin doonta kumanaan carruur Soomaaliyeed ah iyo iyada oo siin doonta taageero naf-badbaadin ah iyo fursad ay ku helaan waxbarasho."

Marka laga soo tago baahiyaha bani'aadamnimo ee ba'an ee ay sababeen duufaanta iyo daadadka, 5.4 milyan qof oo ay ka mid yihiin ku dhowaad 3 milyan oo carruur ah ayaa weli gargaar bani'aadamnimo ugu baahan guud ahaan Soomaaliya. Heerarka nafaqo-xumada ayaa aad u sarreeya, gaar ahaan xerooyinka bulshooyinka barokacayaasha ah.

Tan iyo bilowgii sanadka 2018-ka, UNICEF waxaa ay 119,500 carruur ka yar shan sano jir ah ay gaarsiisey daaweynta nafaqo-xumada aadka u ba'an, taas oo ka dhigan 60 boqolkiiba intii ay hay'addu beegsaneysey sanadka oo dhan. Cudurro dillaaca sida shuban-biyoodka ba'an/daacuunka iyo jadeecada ayaa ah halis kale oo weyn oo soo wajahda carruurta, iyada oo 5,892 xaaladood oo jadeeco ah iyo 5,582 xaaladood oo shuban-biyood ba'an/daacuun ah lagu soo warramey Ilaa maanta.

"Waxaan Midowga Yurub iyo Dalalka Xubnaha ka ahba si weyn ugaga mahadcelineynaa taageeradii ay ana siinayeen iyo aaminaaddii ay noo hayeen sanadaha badan. Taageerada joogtada ah ee ay siiyaan carruura Soomaaliya daraaddeed waxaa inoo suuragashey in aan si dhaqso badan oo fudud aan wax uga qabanno dhibaatooyinka farabadan ee soo wajaha carruurta Soomaaliyeed," ayaa ay tiri Leila Pakkala, oo ah Agaasime-Goboleedka UNICEF ee Bariga iyo Koonfurta Afrika. Laakiin dhibaatadu weli fara-kama-qodna. Ku dhowaad 3 milyan oo carruur ah ayaa weli u baahan taageero. Waxaan dhammaan wada-hawlgayaasha ugu baaqeynaa in ay sii wadaan maalgelinta ay ku bixinayaan badbaadada iyo koboca carruurta Soomaaliya, iyo adkeysiga qoysaskooda iyo bulshooyinkooda."

Maaliyaddii sida deeqsinimadu ku dheehan tahay ay u bixiyeen Midowga Yurub iyo deeq-bixiyeyaal kale, ayaaa UNICEF waxaa ay 238,000 qof ku gaarsiisey adeegyo caafimaad oo degdeg ah; waxaana ay 803,008 qof ka taageertey in ay si ku-meelgaar ah u helaan biyo nadiif ah; waxaa waxbarasho la siiyey 50,791 carruur ah (42 boqolkiiba ay gabdho ahaayeen) waxaana adeegyo ilaalineed la siiyey 4,757 qof.

Maaliyadda uu bixiyey Midowga Yurub ayaa UNICEF gacan ka siin doonta in ay waqtigii loo baahnaa gargaar siiso carruurta Soomaaliyeed iyo qoysaskooda. Carruur lagu qiyaasey 120,000 ayaa heli doona adeegyo isugu dhafan caafimaad iyo nafaqo, kuwaas oo ay ka mid yihiin in 50,000 laga daaweeyo nafaqo-xumada aadka u ba'an, halka ku dhowaad 19,000 carruur iyo qaan-gaar nugul ah, oo badidoodu ay ku nool yihiin xerooyinka qoysaska barokacayaasha ah, ayaa ka-faa'iideysan doona adeegyada waxbarashada iyo ilaalinta ee UNICEF ee ballaarintoodu ay saamaxdey maaliyadda la heley.

Intaa waxa dheer, taageeradu waxaa ay UNICEF u saamixi doontaa in ay soo iibsato, sii-diyaarsato ayna qaybiso xirmooyinka biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda ee degdegga loogu baahan yahay oo ay ku jiraan waxyaabo ay ka mid yihiin agabka biyaha lagu nadiifiyo, weelasha biyaha iyo saabuun, loogu talogaley 254,000 qof.

>> Read in English

Ku saabsan UNICEF

UNICEF waxaa ay Soomaaliya ka shaqeyneysey tan iyo 1972dii markaas oo xafiiskeedii ugu horreeyey ay ka furatey Muqdisho. Maanta UNICEF waxaa ay xafiisyo dhowr ah ku leedahay guud ahaan dalka, oo ay ka mid yihiin Muqdisho, Baydhabo, Garoowe iyo Hargeysa. Annaga oo kaashaneyna in ka badna 130 NGO-yo caalami ah iyo kuwo maxalli ah iyo ururrada ku dhisan

bulshada, ayaa UNICEF waxaa ay bixisaa adeegyo dhinaycada Caafimaadka, Nafaqada, Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda, Waxbarshada iyo Ilaalinta Carruurta isugu jira, waxaana ay wax ka qabataa xaaladaha degdegga ah, waxaana ay bixisaa taageero dhinaca nabad-dhisidda iyo horumarinta ah.

Ku saabsan Waaxda Ilaalinta Madiniga iyo Gargaarka Bani'aadamnimada ee Midowga Yurub

Midowga Yurub iyo Dalalka Xubnaha ka ah ayaa ah kuwa ugu badan ee bixiya gargaarka bani'aadamnimada dunida oo dhan.

Gargaarka bani'aadamnimadu waxaa uu muujinayaa sida ay dadka Reer Yurub u garab-taagan yihiin dadka gargaarka u baahan ee guud ahaan dunida. Waxaa looga danleeyahay in lagu badbaadiyo nafo, looga hortago laguna yareeyo silica aadanaha, laguna ilaaliyo karaamada iyo sharafta aadanaha ee dadka ay saameeyeen aafooyinka dabiiciga ah iyo dhibaatooyinka dad-sameega ah.

Guddiga Reer-Yurub waxaa uu hubinayaa in si degdeg ah oo taabogal ah loo bixiyo gargaarka Midowga Yurub iyada oo loo marayo labada qaab ee ugu waaweyn ee uu adeegsado: ilaalinta madaniga iyo gargaarka bani'aadamnimada.

Guddiga Reer Yurub, isaga oo u maraya waaxdiisa Gargaarka Bani'aadamnimada iyo Ilaalinta Madaniga ah (ECHO), waxaa uu sanad kasta gacan siinayaa 120 milyan qof oo ah dhibbanayaal colaadeed iyo aafooyin.

Waaxda ilaalinta madaniga iyo hawlgallada gargaarka bani'aadamnimada ee Guddiga oo xarunteeda dhexe ay tahay Brussels oo xafiisyo hoos yimaadana ku leh dunida oo dhan, waxaa ay gargaar ku saleysan baahiyaha bani'aadamnimada siisaa dadka ugu nugul.

Macluumaad dheeri ah, booqo oo ka heeg website-ka Guddiga Reer Yurub.

Macluumaad dheeri ah, fadlan kala soo xiriir:

Maxamed Cilmi, UNICEF Somalia
+252 612 450 219, melmi@unicef.org, @unicefsomalia

Anouk Delafortrie, European Commission (Guddiga Reer Yurub)
+254 20 297 2301 / +254 722 791 604, anouk.delafortrie@echofield.eu, @ECHO_CESAfrica